Madyan

مدين

Wadanka Nabi Shucayb Calayhissalaamu

Waxaa dhigay

Dr Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM

بسم الله الرحمن الرحيم

الحمد لله والثناء لله وصلى الله على سيدنا ومولانا ونبينا محمد وعلى آله الطيبين الطاهرين وسلم تسليما كثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون

Madyan/مدين

Maalin jemce ah taariikhduna tahay sagaal iyo labaatan bisha Thuu Al Xajjah ee sanadka kun afar boqol laba iyo soddon, una dhiganta shan iyo labaatanka Novembar laba kun kow iyo toban ayaan Madyan tegey, anigoo ka tegey Tabuuk.

Intaanan Tabuuk joogay maalinta jimce, kaddib markaan salaadda jimce tukaday oo aanan marka labaad qalcada Tabuuk ku noqon wuxuu ninka baabuurka "dabaabah" lehe ii sheegay inuu i geyn karo haddaan doono "Al Badc" ama "Al Bidc" oo ah tuulada ku dheggan "Madayan ee Shucayb", arliga reer Madyan lagu halaagay. Waxaan weydiiyay intuu lacag iga qaadanayo safarkaas, wuxuuna ii sheegay inuu ijaarku yahay laba ilaa laba boqol iyo konton Riyaal. Markaan qalcada markaan labaad kasoo gaddoonnay oo aan u soconno xarunta basaska ayaan hadana weydiiyay intuu safarkaan iga qaadanayo, wuxuu yiri shan boqol! Waan iska daayay inaan la safro, oo markaan weydiiyay sababtuu isku beddelay isagoo marka hor laba boqol yiri hadana laba jabbaar waa ii sheegi waayay.

Safarkaas aniga qorshahayga kuma jirin, oo ninkaan ayaaba i xusuusiyay. Sidaasaan ku gartay inayan Madyan naga fogayn oo taxi lagu tegi karaba. Markaasaan goostay inaan Madyan tago, in kastoo aan ka baqayay inay lacagtaan wato igu filnaan waydo.

Waxaan baabuurkaas uga degay xarunta basaska, anigoo doonaya gaadiid aan u raaco Waadii Al Quraa/Al Culaa. Rag badan ayaa dibadda xafiiskaas jooga oo taxiyo leh, midkood ayaana wuxuu taagnaa albaabka laftiisa, uuna ku tiirsanaaba. Kaasaan weydiiyay hadday jirto cid u socota Al Culaa, oo waxaan ku tala galay inaan habeenkaas Al Culaa u hoydo, subaxa ku xiga oo sabtina aan Al Culaa iyo Madaa'inu Saalex hawsheyda ka qabsado. Markaasuu wuxuu cod dheer ku yiri: "yaa u socda Al Culaa?" nin ayaa yiri: "aniga" oo noo soo dhowaaday. Waxaan weydiiyay intuu ijaarku yahay wuxuuna ii sheegay inuu sideetan Riyaal yahay, wuuna naga gaddoomay. Intuu noo soo socday ayaan ninkaan la taagnaa waxaan weydiiyay hadduu i geynayo Madyan iyo intuu iga qaadanayo. Wuxuu ahaa nin dhallinyaro ah oo waji fiican oo furan leh, ilkana caddeynaya. Wuxuu yiri: "ma hadda ayaad rabtaa inaad tagtid?" Waxaan ku iri: "haa." Wuxuu yiri: "waxay jirtaa laba boqol iyo lixdan kiiloomitir, waxaanna kaa qadanayaa saddex boqol oo Riyaal." Sidaas ayaan kula heshiiyay, waana dhaqaaqnay. Wuxuu yiri: "waxaan qaadanaynnaa baabur kale oo midkaan ka dheereeya kana xoog badan, kana raaxa badan." Gurigiisaan tagnay, wuxuuna iska dhigay toyootada laba shirleyda ah, wuxuuna la soo baxay Hyundai kuwa buuraha ciidda ah tafa. Waana dhaqaaqnay. Markaas waa sideed saac kaddib markaan jimce iyo casar oo aan soo hormariyay masjidka Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ku soo tukaday, anigoo isaga ku dayanaya, sidaasna kuba dhawaaqay markaan xirinayay, siduu duhurka iyo casarka isku raacin jiray iyo maghribka iyo cishahana isku raacin jiray intuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Tabuuk joogay.

Gobolkaan marnay wuxuu ahaa buuraaleey, buuro dheerdheer oo uu saaxiibkay ii sheegay in xilliga qaboobaha ah uu baraf dushooda ku da'o.
Maghrib iyo cishe waxaan wada jir ku tukannay buur gaaban dusheed, kaddib markuu baabuurku ciida buurtaan dul saaran xoog ku tafay. Buurtaas dusheeda markaad saaran tahay waxaa hoostaada ah Badda Cas oo in yar ilaa laba kiiloomitir noo jirta. Salaadda kaddib waxaan u leexannay midig oo aan xeebta Badda Cas ag marnay, aan tuuladaas dhex marnay kaddibna, qiyaas afartan kiiloomitir oo barriga ah waxaan tagnay tuulada la yiraahdo Badac oo ay Madyan ka mid tahay.
Markaan xoogaa soconnayba waxaan aragnay looxad noo tilmaamaysa inay Madyan iyo Degmada Nabi Shucayb Calayssalaamu bidixda naga qabanayaan.
Waxaan arkay inay Madyan tahay siduu Ilaahay Tacaalaa Quraanka noogu sheegay oo ay guryohooda ka qoteen buuraha, sida Aayadda afar iyo toddobaatan ee Suuratu Al Acraafi:

وَاذْكُرُوا إِذْ جَعَلَكُمْ خُلَفَاءَ مِنْ بَعْدِ عَادٍ وَبَوَّأَكُمْ فِي الْأَرْضِ تَتَّخِذُونَ مِنْ سُهُولِهَا قُصُورًا وَتَنْحِتُونَ الْجِبَالَ بُيُوتًا فَاذْكُرُوا آَلَاءَ اللَّهِ وَلَا تَعْثَوْا فِي الْأَرْضِ مُفْسِدِينَ (74)

"Wathkruu ith jacalakum khulafaa'a min bacdi Caadin wa bawwa'akum fii al ardi tattakhithuuna lk suhuulihaa qusuuran wa tanxituuna al jibaala buyuutan fath-kuruu aalaa'a Allaahi wa laa tacthaw fii al ardi mufsidiina(74)**."**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
"Waxaadna xusuusataan inuu idinka dhigay kuwa dhaxla reer Caad dabadood, uuna idin dejiyay arliga: intiisa fidsan oo simanna aad guryo waawayn ka dhisanaysaan, buurahana aad guryo ka qoranaysaan – oo xilliga kuleylaha ahna ama jiilaalkana waxay degi jireen guryaha dhoobada laga sameeyey oo dhulka siman ku yaalla, xilliga qaboobahana waxay degi jireen guryahay buuraha ka qoteen; waxaa kaloo la yiri inay buuraha guryo uga qodan jireen ayagoo ayan guryaha dhoobada laga sameeyey ayan raageyn ayagoo reer Caad cumrigoodu dheeraa oo ay guryuhu ayagoo wali nool baab'i jireen – marka xusuusta nicmooyinkuu Ilaahay idin siiyay, arliga dhexdiisana fasaad ha ku suubinina(74)."

Buurahaasu waxay ka samaysan yihiin dhagax xoogaa jilicsan oo si sahlan loo qori karo.
Intaan ku dhex soconnay waxaan lahaa "ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa ash-hadu anna Muxammadan Rasuulu Allaahi, ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa ash-hadu anna Shucayban Rasuulu Allaahi Sallaa Allaahu Calayhim wa Sallam."

Guryuhu waxay ku faafsan yihiin buuro badan oo lama wada gaaro, intii noo qornayd ayaanna galnay oo aan dhexdooda soo masawiray. Guryaha qaarkood waa guryaha la dego, qaar waa qubuuro, midna waxayba rag meesha joogay noo sheegeen oo sideenno kale u yimid gacantana kitaabay wax ku dhigan wata inuu god hoos u qodan oo hoos u dheer u ahaa xabbis. Markaasuu ninka aan wada soconnay wuxuu yiri: "adinku ma gasheen?" Waxay yiraahdeen: "haa, waxaana salkiisa ku yaalla qubuuro."
Raggaas ayaan waydiinnay bartuu ku yaallo ceelkii Madyan wayna noo tilmaameen, fartana noogu fiiqeen, meel ilaa shan kiiloomitir u jirta bartaas aan taagannahay, oo ka baxsan buurahaan siliggu ku wareegsan yahay oo halka albaab laga soo galo. Albaabkaasu wuxuu kasoo horjeedaa kaltanka baansiinka oo dariiqa dhinaca kale uga

yaalla. Meshey ceelka noogu tilmaameenna xaafad hadaba la deggan yahay ayay ku dhex taalla, waxaase ku wareegsan ayada silig.

Markaan barta ceelka naloogu sheegay tagnay ayaan waynnay. Markaasaan waxaan weydiinnay nin baabuur wayn alaab ku rarayay, oo hortaagan guryo halkaas ka dhisan. Markaasuu farta noogu fiiqay, wuxuuna ceelka halkaas u jiray ilaa boqol mitir qiyaas. Bartuu ceelku ku yaallo waxaa ku wareegsan silig wareeggiisu ilaa dhawr kiiloomitir yahay, oo waxaan ceelkaas ahayn ayan dhexdiisa ku oollin. Barta uu ninku taagnaa waxaa siligga ka furan intuu baabuur mari karo oo siligga laga gooyay. Meeshaas furan agteedana waxaa ku cayaarayay oo joogay saddex wiil oo ilaa toban jirro aan ku qayaasay. Ayagaas ayaan weydiinnay meesha siligga laga geli karo, markaasay na tuseen, oo markaan galnayba naga soo daba galeen. Ceelku meeshuu siliggu ka furan yahay wuxuu u jiraa ilaa soddon ama afartan mitir.

Ceelkii ayaan dul nimid, wa al xamdu li Allaahi: arag masawirrada ceelkaas aan kasoo qaaday.

Halkaas ayuu Nabi Muuse Calayhissalaamu toban sano degganaa oo ka shaqaynayay, isagoo Nabi Shucayb Calayhissalaamu arigiisa u raaci jiray, ijaarkiisuna uu ahaa cunnadiisa iyo inuu gabadhiisa u guuriyo markuu ariga u raaco sideed ama toban sano. Wuxuuna u raacay toban sano.

Ibnu Jariir Al Dhabarii/إبن جرير الطبري

Al Dhabarii wuxuu kitaabkiisa “Taariikhu Al Dhabarii” ku yiri: “Ilaahay Tabaraaka wa Tacaalaa wuxuu Shucayb Nabi ahaan ugu diray dadka Madyan waana isla “Asxaabu al Aykati”.”
Al Dhabarii wuxuu yiri: Yaziid Al Baahilii wuxuu yiri: “waxaan Cabdu Allaahi bin Cabbaas weydiiyay Aayaddaan

فَكَذَّبُوهُ فَأَخَذَهُمْ عَذَابُ يَوْمِ الظُّلَّةِ إِنَّهُ كَانَ عَذَابَ يَوْمٍ عَظِيمٍ (189)

“Fa kath-thabuuhu fa akhathahum cathaabu yawmi al thullati innahu kaana cathaaba yawmin cathiimin(189)**.”**
Waana Aayadda boqol sagaal iyo sideetan ee Suuratu Al Shucaraa, macneheeduna waxaa weeye:
“Markaasaey beeniyeen oo diideen, markaasaa waxaa haleeshay oo qabatay cathaabta maalinta “daruurta” oo ahayd daruur wayn oo la dul keenay markaasay kulaylka qorraxda harkeeda ka harsadeen, markaasay daruurtu waxay kusoo daysay dab ku jiray oo ay halaagmeen, kaasoo ahaa cathaabta wayn ee maalin wayn(189).”

Markaasuu Cabdu Allaahi bin Cabbaas wuxuu yiri: “Ilaahay wuxuu kusoo diray kulayl aad u xoog badan oo ay la neefsan waayeen. Markaasay guryohooda uurkiisa galeen. Markaasuu uga soo daba galay guryohooda oo ay neefsan waayeen. Markaasay guryihii kasoo baxeen oo ay miyiga u carareen. Markaasuu Ilaahay Cazza wa Jalla wuxuu usoo

diray daruur, taasoo qorraxda ka hoosaasisay. Markaasay daruurtaas waxay ka heleen qabow, kuna macaansadeen. Markaasay qaarkood qaarkii kale u yeereen inay halkaas ugu yimaadaan. Markaasay markay daruurtaas hoosteeda kusoo wada idilaadeen oo isugu wada yimaadeen ayuu Ilaahay wuxuu korkooda kusoo diray dab." Cabdu Allaahi ibnu Cabbaas wuxuu yiri: "taas weeye cathaabta "cathaabu yawmu al thullah." "innahu kaana cathaaba yawmin cathiimin." Waa intaas warka ibnu Jariir Al Dhabarii.
Al Dhabarii wuxuu wariyay inuu magaciisu ahaa Shucayb bin Sayfuun bin Cayfaa bin Naabit bin Madyan bin Ibraahiim, koofaartiisuna waxay ahayd "Khadhiibu Al Anbiyaa'i" oo ah "khadhiibka Anbiyada" isagoo cod kar ahaa.

(www.tabuknature.com)

(www.tabuknature.com) wuxuu yiri: **"المقريزي Al Maqriizii** wuxuu yiri: "ogow inay Madyan yihiin ummadda Shucayb waana Banuu Madyaan bin Ibraahiim Calayhissalaamu, hooyadoodna waa Qandhuuraa' Al Kancaaniyah, waxayna u dhashay sideed wiil, oo ay ummado ka farcameen. Madyan waxay ku taalla Badda "Al Qulzum" (ahna Badda Cas, oo Qulzum waxaa la oran jiray magaalada Masar ku taalla oo hadda Suways la yiraahdo uuna gacanka Suwayz ka bilowdo, taasoo badda oo idil lagu magacaabay: xasanwali), waxayna la siman tahay Tabuuk oo ay u jirtaa lix maraaxil, ayadaana ka wayn Tabuuk. Madyan waxaa ku yaalla ceelka uu Muuse ka waraabin jiray ariga daaqa ee Shucayb. Wuxuuna halkaas ka dhistay oo ku lahaa guri." Waa intaas warkiisu.
Al Mascuudii/المسعودي wuxuu yiri: "Dadka shareecada kala duwan lehi (waan muslimiinta, krishtaanka iyo yuhuudda) way isku khilaafeen kuway ahaan ahaayeen qawmka Shucayb bin Nawfal bin Racwiil bin Murr bin Cayqaan bin Madyan bin Ibraahiim Calayhissalaamu. Afkiisuna wuxuu ahaa afka carabiga.." Waa intaas warkiisu, waana intaas intaas websitekaas kasoo qaadannay.

Al Maqriizii/المقريزي

Al Maqriizi kutubbadiisa waxaa ka mid ah Kitaabka la yiraahdo **الإلمام بأخبار من بأرض الحبشة من ملوك الإسلامAl Ilmaamu bi Akhbaari Man bi Ardi Al Xabashah min Muluuki Al Islaami** waxaa allifay **أبو العباس الحسيني العبيدي أحمد بن علي بن عبد القادر إبن محمود تقي الدين المقريزي**Abuu Al Cabbaas **Al Xusaynii** Al Cubaydii Axmad bin Calii bin Cabdu Al Qaadir ibnu Muxammad Taqiyyu Al Ddiini Al Maqriizii, taariikh yahanka arliga Masar, asalkiisuna uu yahay gobolka Bacalbak ee Lubnaan, looma nisbeeyey tuulada Al Maqaarizah, siduu Al Zereklee wariyay. Wuxuu ku dhashay, wax ku bartay kuna dhintay Qaahira arliga Masar, halkaasoo uu xilal badan oo diini ah ka qabtay, sida Imaamnimada, Khadhiibnimada iyo kuwo kaleba. Sanadka sideed boqol iyo toban wuxuu tegey Dimishiq isagoo uu la socdo wiilkiisa Al Naasir, halkaasoo loogu soo jeediyey inuu Qaallinnimada Dimishiq qabto, uuna diiday. Wuxuu noolaa inta u dhexeysa toddoba boqol iyo lix iyo toddobaatanka ilaa sideed boqol iyo shan iyo afartanka Hijriga ah, una dhigantah kun iyo saddex boqol iyo shan iyo lixdan ilaa kun iyo afar boqol iyo kow iyo afartan Miilaadiga. Ilaa laba boqol oo kutub ayuuna allifay. Al Maqriizii waa dhasha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo ku abtirsada Al Xusayn bin Faadhimah, Sallaa Allaahu Calayhim Wasallam. Kitaabkaan waxaa lagu daabacay

sanadka miiladiga ah ee kun iyo sideed boqol iyo shan iyo sagaashan Madbacada Madhbacatu Al Ta'lif ee Qaahira, arliga Masar, waana kitaab yar oo ka kooban toddoba iyo labaatan bog. Al Maqriizii wuxuu bogagga afar iyo labaatanaad ku yiri: "Barbara. Qaala ibnu Saciid: "Wa madiinatu Barbara qaacidatu al baraabir wa qad aslama aktharuhum, fa lithaalika cadamu raqiiqihim fii bilaadi al islaami." Warkaas macnihiisu waxaa weeye: "Magaalada Barbara waa magaalo madaxda barbariyiinta, kuwaasoo intooda badani ay hore u islaameen, taasoo u sabab ah inaan addoommo ayaga u dhashay laga helin arliga islaamka", ayadoo uusan muslim muslim kale addoonsan karin oo ayan bannaaneyn. Kitaabkan Al Maqriizii laga bilaabo bogga kow iyo labaatanaad ilaa toddoba iyo labaatanaad wuxuu leeyahay cinwaan kale oo ah **ذكر الجانبي الجنوبي من الأرض وهو بلاد السودان"Thikru Al Jaanibu Al Junuubi mina Al Ardi wa Huwa Bilaadu Al Suudaani."** Kitaab isla magacaas lehna waxaa allifay Abuu Al Fidaa', aan taariikhdiisa isagana kitaabkaan wax uga sheegnay.

Al Mascuudii/المسعودي

Al Mascuudii, waa **عبد الرحمن بن عبد الله بن عتبة بن مسعود الكوفي الحافظ** Cabdu Al Raxmaan bin Cabdu Allaahi bin Cutbah bin Mascuud al Kuufii, al xaafith, dhintayna sanadka boqol iyo lixdan ama shan iyo lixdan Hijriga, uuna ibnu Numayr ka yiri: "wuxuu ahaa nin thiqqah ah oo lagu kalsoon yahay, markii dambena isku qasmay, ibnu Muscar uu yiri: "Ma ogi qof isaga uga cilmi badan cilmiga Cabdullaahi ibnu Mascuud", Allaha raalli ka noqdee. Ibnu Mascuud wuxuu ku abtirsadaa saxaabiga wayn Cabdu Allaahi bin Mascuud, una dhashay qabiilka Huthayl, Allaha labadoodaba u naxariistee. Al Mascuudii wuxuu ahaa dalmareen wayn, waana ninka dhigay kitaabka wayn ee **مروج الذهب** Muruuju Al Th-thahabi. Dalalka uu tegeyna waxaa ka mid ahayd Soomaaliya oo uu wax ka dhigay isagoo tilmaamaya sidaas waagiisaas ahayd.

Al Mascuudi wuxuu kitaabkiisa **مروج الذهب** ”Muruju Al Th-thahabi” mujalladka labaad bogga boqol sideed iyo labaatan ku yiri, isagoo ka hadlaya qawmu Shucayb: ”waxaana dadka ka mid ah kuwa yiri inay **قوم شعيب** qawmu Shucayb ay ka mid yihiin ubadka **المحض بن جندل بن يعصب بن مدين بن إبراهيم** Al Maxdu bin Jandal bin Yacsub bin Madyan bin Ibraahiim, Shucaybna uu yahay walaalkood xagga nasabka. Waxayna ahaayeen tiro boqorro ah una taliya boqortooyin isku xigxiga iyo kuwa kala fogba. Waxaana ka mid ah kuwa la kala yiraahdo **أبو جاد** Abuu Jaad iyo **هوز** Hawz iyo **حطي** Xadhii iyo **كلمن** Kalman iyo **سعفس** Sacfas iyo **قرشت** Qurshat, sidaan usoo sheegnayna waa dhasha Al Maxdu bin Jandal...Abjad wuxuu ahaa boqorka Makkah iyo inta la xiriirta ee **حجاز** Xijaaz, Hawz iyo Xadhii waxay laba boqor ka ahaayeen arliga **وج** Wajj oo ah arliga **الطائف** Al Dh-dhaa’if iyo inta la xiriirta ee gobolka **نجد** Najd. Kalman iyo Scfas iyo Qurshat waxay boqorro ka ahaayeen Madyan. Waxaa kaloo la yiri waxay boqorro ka ahaayeen arliga Masar. Kalman wuxuu boqor ka ahaa Madyan.” Wuxuu kaloo yiri: ”boqortooyada Madayan waxaa lahaa oo boqor u ahaa waqtiga Shucayb Kalman (ama waa godan yahay oo waa Kulman ama Kilamn)...cathaabta **عذاب يوم الظلة** ”cathaabu yawmu al thullah” waxay ku dhacday isagoo dadkiisa la jooga. Shucayb Ilaahay ayuu ugu yeeray wayse beeniyeen, markaasuu ku cabsiiyay kuna ballamiyay cathaabta ”yawmu al thullah”. Markaasaa waxaa Samada korkooda looga furay albaab uu dab uga soo degay. Shucayb iyo inta rumaysana waxay galeen oo ay Madyan uga leexdeen meesha la yaqaanno oo ah **الأيكة** ”Al Aykah”, oo ah kayn Madyan agteeda ah. Markaasay markay dadku dareemeen balada kusoo socota,

kulaylkiina uu ku batay, ayna hubsadeen inay halaagmayaan waxay raadiyeen Shucayb iyo inta rumaysay, kuwaasoo ay hoosaasisay daruur cad oo fiican oo naacaw iyo caraf fiicanba leh, ayagoo aan dareemeyn wax xanuun ah oo cathaabtaas ka mid ah. Markaasay Shucayb iyo inta rumaysay kasoo saareen meeshaas ay joogeen, ayagoo u maleeyey in hadday sidaas yeelaan oo ay ayagy meeshaas ay Shucayb ka saareen degaan ay ayagu ka badbaadayaan waxa kusoo degay. Markaasuu Ilaahay daruurtaas naar iyo dab uga dhigay. Boqorradaas waxay leeyihiin akhbaar cajiib ah kuna saabsan duullaanno iyo dagaallo iyo siday ku qabsadeen boqortooyinkaan, ayna u cirib tireen oo wada laayeen dadkii hore u degganaa iyo ummadihii halkaas ku noolaa ayaga hortood."
Warkiisu waa intaas.

(www.ar.wikipedia.org)

Websiteka (www.ar.wikipedia.org) waxay tiri: "**Al Badac/البدع** waxay ku taalla Badda Cas agteeda, waxayna u jirtaa ilaa soddon kiiloomitir Khaliiju **العقبة** Al Caqabah. Magaalada **Xaql/حقل** waxay ayadu ku taalla bilowga iyo madaxa **خليج العقبة** Khaliiju Al Caqabah, waxayna u dhowdahay magaalada **Al Caqabah/العقبة** ee dalka **أردن** Urdun, waxayna Tabuuk u jirtaa laba boqol kiiloomitir, waana magaalo ku taalla xuduudda boqortooyada. Markaad Xaql joogtid waxaad indhahaaga ku arki kartaa saddex dawladood oo magaalooyin dhowr ah markaad xeebta Xaql tagtid. Magaalada Taymaa'na waxay Tabuuk u jirtaa laba boqol shan iyo labaatan kiiloomitir, waxayna ka tirsan tahay gobolka Tabuuk.
Waa intaas warkiisu.

Ibnu Al Athiir/إبن الأثير

Ibnu Al Athiir, oo noolaa inta u dhexeysay shan boqol iyo konton ilaa lix boqol iyo soddon Hijriga wuxuu kitaabkiisa **الكامل في التاريخ** Al Kaamilu fii Al Taariikhi, bogga konton ku yiri:
"**قتادة Qataadah** wuxuu yiri: "Ilaahay wuxuu Shucayb u diray laba ummadood: tolkiisa dadka Madyan iyo "Asxaabu Al Aykati/**أصحاب الأيكة".** Al Aykahna wuxuu ahaa geed isku laablaabma, sida ku xusan Aayadda boqol sagaal iyo sideetan ee Suuratu Al Shucaraa'i. Markaasuu Ilaahay markuu doonay inuu cathaabo wuxuu ku salliday kulayl aad u badan, wuxuuna korkooda keenay cathaabtooda oo ahayd daruur. Markaasay markay daruurtu usoo dhowaatay usoo baxeen ayagoo rajaynaya inay qabow ka helaan. Markaasay markay hoos yimaadeen ayay dab kusoo shubtay. Taas weeyana macnaha Aayaddaasu.
Reer Madyanna waa ubadka **مدين بن إبراهيم الخليل** Madyan bin Ibraahiim Al Khaliil. Ilaahayna wuxuu ku cathaabay "**al rajfah/الرجفة"** oo ah dhulkoo la gariiray, markaasay wada halaagmeen." Waa intaas warkiisu.
Waana siday noo sheegtay Aayadda kow iyo sagaashan ee Suuratu Al Acraafi:

فَأَخَذَتْهُمُ الرَّجْفَةُ فَأَصْبَحُوا فِي دَارِهِمْ جَاثِمِينَ (91)

"Fa akhathathumu al rajfatu fa asbaxuu fii daarihim jaathimiina(91)**."**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:

“Markaasaa waxaa qabtay dhul gariir markaasay daarohooda dhexdooda ku wada dhinteen(91).”

Al Imaamu **الإمام المحدث علي بن محمد بن عبد الكريم بن عبد الواحد الجزري الشيباني عز الدين** al muxaddath Calii bin Muxammad bin Cabdu Al Kariimi bin Cabdu Al Waaxid Al Jazarii, Al Shaybaanii, Abuu Al Xasan, koofaartiisuna Cizzu Al Ddiini tahay, loona yaqaanno **إبن الأثير Ibnu Al Athiir**, wuxuu ku dhashay **جزيرة إبن عمر** Jaziiratu ibnu Cumar, ee waqooyiga **عراق** Ciraaq ku taalla sanadka shan boqol shan iyo konton, una dhigantah kun boqol iyo lixdan ee miilaadiga ah, wuxuuna ku dhintay Al Muusil/**الموصل** ee waqooyiga dalka Ciraaq sanadka lix boqol iyo soddon Hijrada una dhiganta kun laba boqol saddex iyo soddon miilaadiga ah. Wuxuu ahaa caalin ku xeel dheer taariikhda iyo nasabka iyo adabta suugaanta ah. Kutubbaduu allifay waxaa ka mid ah kitaabka Al Kaamilu oo laba iyo toban mujallad ka kooban kuna saabsan taariikhda ilaa sanadka lix boqol sagaal iyo labaatan, oo uu Al Ziriklii yiri: "inta badan ee culummada taariikhda oo isaga ka dambeeyey waxay ciyaal u yihiin oo ka barteen kitaabkiisaan". Wuxuu kaloo dhigay kitaabkaan la yiraahdo Usudu Al Ghaabah fii macrifati al ssaxaabah.

Al Khadhiibu Al Baghdaadii/الخطيب البغدادي

Al Zarqaanii wuxuu yiri: “Al Khadhiibu Al Baghdaadii waa **الحافظ أبو بكر أحمد بن علي بن ثابت** al xaafith Abuu Bakr Axmad bin Calii bin Thaabit, midka kutubbada badan dhigay, imaamka wayn, imaamka xadiithka ee Shaam iyo Ciraaq, midka si la hubo u tifaftira xadiithka, caalinka u cilmi leh xadiithka midkiisa saxiixa ah iyo midka buka, kuna dheereeya xadiithka cilladihiisa iyo silsiladaha wariyaba. Wuxuu dhashay sanadka saddex boqol laba iyo sagaashan Hijriga, wuxuuna daneeyey xadiithka, gobolladuuna ugu kala safray, wuxuuna dhegeystay oo ka qaatay Abuu Al Ssalt Al Ahwaazii iyo Abaa Cumar bin Mahdii iyo khalqi badan. Isagana waxaa ka wariyay Al Barqaanii oo ka mid ah shuyuukhdiisa iyo ibnu Maakuulaa iyo khalqi badan. Wuxuu Kariimah Makkah dhexdeeda uga bartay Al bukhaarii shan maalmood, Ismaaciil Al Xiyarii-na saddex fadhi waxaana xusay oo wariyay Al Tha-habii oo yiri: “waana amar lala yaabo.” Wuxuu ku dhintay Baghdaad maalinta toddobaad ee Thuu Al Xijjah ee sanadka afar boqol saddex iyo lixdan Hijriga, waxaana lagu duugay Bishr Al Xaafii agtiisa, isagoo in halkaas iyo ninkaas agtiisa lagu duugo biyaha Zamzam u caabbay oo ku ducaystay.” Waana intaas warkiisu.

Al Khadhiibu wuxuu kitaabkiisa **قصص الأنبياء** “Qisasu Al Anbiyaa’i bogga boqol sideed iyo afartan iyo inta ka dambeysa ku yiri isagoo ka hadlaya qisada Nabi Shucayb calayhissalaamu ku yiri:
“Ilaahay Tacaalaa wuxuu yiri:

وَإِلَى مَدْيَنَ أَخَاهُمْ شُعَيْبًا

“Wa ilaa Madyana akhaahum Shucayban.”
“Madyanna waxaan u dirnay walaalkooda ay isku nasabka yihiin ee Shucayb.”
Oo wuxuu walaalkood u yiri isagoo ayaga ka dhasahay oo la nasab ah.
Wuxuu kaloo Tacaala yiri:

كَذَّبَ أَصْحَابُ الْأَيْكَةِ الْمُرْسَلِينَ (176) إِذْ قَالَ لَهُمْ شُعَيْبٌ أَلَا تَتَّقُونَ (177)

“Kath-thaba asxaabu al aykati Al Mursaliina(176)Ith qaala lahum Shucaybun alaa tattaquuna(177)**.”**
Waana Aayadaha boqol lix iyo toddoba iyo toddobaatan ee Suuratu Al Shucaraa’i oo macnohoodu yahay:
“Dadka arliga Al Aykatu degana waxay beeniyeen Rususha lasoo diray(176)Shucaybna wuxuu ku yiri: “Miyaadan Ilaahay ka dhawrsanayn?”(177).”
Ilaahay Tacaalaa “Asxaabu Al Aykah” ma oran “walaalkood” maxaa yeelay ayagaas kama uusan dhalan.
Reer Madyan gaalnimadooda waxay ku darsadeen inay dhimi jireen oo khayaani jireen beegga iyo miisaanka badeecadaha. Markaasuu Shucayb Ilaahay Tacaalaa ugu yeeray inay ka baqaan, waana Aayadda shan iyo sideetanaad ee Suuratu Al Acraaf:

وَإِلَى مَدْيَنَ أَخَاهُمْ شُعَيْبًا قَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُمْ مِنْ إِلَهٍ غَيْرُهُ قَدْ جَاءَتْكُمْ بَيِّنَةٌ مِنْ رَبِّكُمْ فَأَوْفُوا الْكَيْلَ وَالْمِيزَانَ وَلَا تَبْخَسُوا النَّاسَ أَشْيَاءَهُمْ وَلَا تُفْسِدُوا فِي الْأَرْضِ بَعْدَ إِصْلَاحِهَا ذَلِكُمْ خَيْرٌ لَكُمْ إِنْ كُنْتُمْ مُؤْمِنِينَ (85)

“Wa ilaa Madyana akhaahum Shucayban qaala yaa qawmi acbuduu Allaaha maa lakum min Ilaahin ghayruHu qad jaa’atkum bayyinatun min Rabbikum fa awfuu al kayla wa al miizaana wa laa tabkhasuu al nnaasa ashyaa’ahum wa laa tufsiduu fii al ardi bacda islaaxihaa thaalikum khayrun lakum in kuntum mu’miniina(85)**.”**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
“Dadka Madyan degana waxaan u dirnay walaalkood Shucayb, wuxuun ku yiri: “tolkeeyow, Ilaahay caabuda oo ma lihidin ilaah aan Isaga ahayn, waxaana hubaal ah inay idiin timid Aayad, waa calaamadee - waxaa la yiri: Aayadda la tusay Quraanku ma sheegin, waxaana kaloo la yiri: waa imaatinka uu u yimid oo loo soo diray Shucayb laftiisa – miisaankana oofiya iyo beegaba, dadkana xuquuqdooda ha ka dulminina oo ha dhiminina oo ha naaqusina, arligana dhexdiisana ha fasaadina kaddib marka la suubiyay oo lagu suubiyay in Rusul la soo diray iyo caddaalad, taasaa idiin khayr badan haddaad mu’miniin tihiin(85).”
Kaddibna wuxuu ka reebay inay beegga iyo miisaanka naaqusiyaan, wuxuuna ku yiri, waana Aayadda afar iyo sideetan ee Suuratu Huud:

وَإِلَى مَدْيَنَ أَخَاهُمْ شُعَيْبًا قَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُمْ مِنْ إِلَهٍ غَيْرُهُ وَلَا تَنْقُصُوا الْمِكْيَالَ وَالْمِيزَانَ إِنِّي أَرَاكُمْ بِخَيْرٍ وَإِنِّي أَخَافُ عَلَيْكُمْ عَذَابَ يَوْمٍ مُحِيطٍ (84)

“Wa ilaa Madyana akhaahum Shucayban qaala yaa qawmi acbuduu Allaaha maa lakum min Ilaahin ghayruHu wa laa tanqusuu al mikyaala wa al miizaana inni araakum bi khayrin wa inni akhaafu calaykum cathaaba yawmin muxiidhin(84)**.”**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:

“Dadka Madyan degana waxaan u dirnay walaalkood Shucayb, wuxuuna ku yiri: “tolkeeyow, Ilaahay caabuda oo ma lihidin ilaah aan Isaga ahayn, beegana ha naaqusinina iyo miisaanka, dadkana xuquuqdooda ha ka dulminina oo ha dhiminina oo ha naaqusina, oo anigu waxaan u jeedaa inaad khayr ku sugan tihiin, waxaanna idiinka baqayaa cathaabta maalin wayn(84).”

Aayadda boqol saddex iyo sideetan ee Suuratu Al Shucaraa’ wuxuu ku yiri:

وَلَا تَبْخَسُوا النَّاسَ أَشْيَاءَهُمْ وَلَا تَعْثَوْا فِي الْأَرْضِ مُفْسِدِينَ (183)

“Wa laa tabkhasuu al nnaasa ashyaa’ahum wa laa tacthaw fii al ardi mufsidiina(74)**.”**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
“Dadkana xuquuqdooda ha ka dulminina oo ha dhiminina oo ha naaqusina, arliga dhexdiisana fasaad ha ku suubinina(74).”

Wuxuu kaloo Suuratu Huud ku yiri:

بَقِيَّةُ اللَّهِ خَيْرٌ لَكُمْ إِنْ كُنْتُمْ مُؤْمِنِينَ وَمَا أَنَا عَلَيْكُمْ بِحَفِيظٍ (86) قَالُوا يَا شُعَيْبُ أَصَلَاتُكَ تَأْمُرُكَ أَنْ نَتْرُكَ مَا يَعْبُدُ آبَاؤُنَا أَوْ أَنْ نَفْعَلَ فِي أَمْوَالِنَا مَا نَشَاءُ إِنَّكَ لَأَنْتَ الْحَلِيمُ الرَّشِيدُ (87)

“Baqiyyatu Allaahi khayrun lakum in kuntum mu’miniina wa maa anaa calaykum bi xafiithin(86)**Qaaluu yaa Shucaybu asalaatuka ta’muruka an natruka maa yacbudu aabaa’unaa aw an nafcala fii amwaalinaa maa nashaa’u innaka la’anta al xaliimu al rrashiidu**(87)**.”**
Aayadaha macnohoodu waxaa weeye:
“ibnu Cabbaas wuxuu yiri: “macneheedu waxaa weeye: wuxuu Ilaahay idiin reebo oo idiin hara oo xalaasha ah kaddib markaad beegga iyo miisaanka oofisaan ayaa idiinka khayr badan waxaad ku qaadanaysaan adinkuu beegga iyo iyo miisaanka naaqusiya”, haddaad mu’miniin tihiin. Aniguna wakiil idinkama ihi(86)Waxay yiraahdeen: “Shucaybow, ma salaaddaada ayaa ku amraysaa inaan asnaamta ay aabayaalkeen caabudi jireen ka tagno? Ibnu Cabbaas wuxuu yiri: “waxay sidaas u yiraahdeen isagoo Shucayb salad badan tukan jiray.” Ma salaaddaada ayaa ku amraysa inaanan maalkeenna ku samayn Karin waxaan doonno? Adigaa ah midka doqonka ah oo maangaabka ah.”

Waxaa la wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam marka la xusay Shcayb iyo siduu dadkiisa ula hadlay uu yiri:

خطيب الأنبياء

“Khadhiibu Al Anbiyaa’i” oo macnihiisu yahay: “Khadhiibka ama codkarka Anbiyada” uuna ka wado si wanaagsan oo codkarnimada leh oo uu dadkiisa u waaniyay.
Siday beegga iyo miisaanka u khayaani jireenna waxay ahayd sidatan: nin walboo ayaga ka mid ihi wuxuu lahaa laba beeg iyo laba miisaan oo midkoodna weyn yahay kan kalena

yar yahay. Markaasay markay ayagu wax soo gadanayaan waxay kusoo beegan jireen kuna soo miizaaman jireen midka weyn, markay ayagu wax sii iibinayaanna midkooda yar.
Waxay kaloo dadka ka qaadan jireen dirhamkooda fiican markaasay waxay u celin jireen, waana markay wax ka gataan, lacag xun oo aan wax qiimo ah lahayn oo la been abuuray.
Abuu Al Dardaa' wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

أول من نقص وطفف المكيال والميزان قوم شعيب فأهلكهم الله تعالى لذلك، ولينتهي هذه الأمة حتى يفعلها.

"awwalu man naqasa wa dhaffafa al mikyaala wa al miizaana qawmu hucayb fa ahlakahumu Allaahu Tacaalaa li thaalika. Wa la yantahii haathi al ummatu xattaa yafcalahaa."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Kan ugu horreeyey oo naaqusiyay oo dhima beegga iyo miizaanka waxay ahaayeen dadka Shucayb, markaasuu Ilaahay Tacaalaa taas daraadeed u halaagay. Ummaddaanna dhammaan mayso jeer ay ayaduna sidaas oo kale sameyso."
Wahb bin **Munabbah**/**وهب بن منبه** wuxuu wariyay inay qawmu Shucayb lahaayeen boqor xadgudub badan uuna dadkiisa ku amray inay beegga iyo miisaanka dhimaan, cunnadana ay uruursadaan (oo ayan gadine bal kaydsadaan si marka suuqa looga waayo uu sicirkeedu ugu bato oo ay qaali ku gadaan). Markaasay adeecaan. Markaasuu Shucayb taas ka reebay. Markaasaa waxaas uu Shucayb yiri boqorka loo sheegay. Markaasuu boqorku Shucayb u yeeray uuna ku yiri: "ma adigaa ah midka dadka ka reebaya waxaan anigu amray inay falaan?" Markaasuu Shucayb wuxuu yiri: "haa, oo aniguu waxaan ka helay Kitaabka Ilaahay Tacaalaa in hadduu boqorku yahay mid dadka xumaanta ku xambaara uuna taas sameeyo, markaas boqorkaasu waa malcuun naxariista Ilaahay laga fogeeyey gaal ah faajir ah ah." Markaasuu boqorku wuxuu amar bu baxshay in Shucayb magaalada laga saaro, waana kaas hadalka Ilaahay Tacaalaa, waana Aayadda sideed iyo sideetan ee Suuratu Al Acraafi:

قَالَ الْمَلَأُ الَّذِينَ اسْتَكْبَرُوا مِنْ قَوْمِهِ لَنُخْرِجَنَّكَ يَا شُعَيْبُ وَالَّذِينَ آمَنُوا مَعَكَ مِنْ قَرْيَتِنَا أَوْ لَتَعُودُنَّ فِي مِلَّتِنَا قَالَ أَوَلَوْ كُنَّا كَارِهِينَ (88)

"Qaala al mala'u allathiina istakbaruu min qawmihi lanukhrijannaka yaa Shucaybu wa allathiina aamanuu macaka min qaryatinaa aw la tacuudunna fii millatinaa qaala awalaw kunnaa kaarihiina(88)**."**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
"Madaxdooda oo iskala waynaaday iimaanka iyo inay Shucayb rumeeyaan oo tolkiisa ka midka ah waxay yiraahdeen: "Shucaybow, adiga iyo inta ku rumeysayba waa idinka saaranyaa degmadeenna amase waxaad ku soo noqoneysaan diinteenna": wuxuu yiri: "ma dooneynno oo waan kahanaeynnaa ee ma nagu khasbeysaan?" Shucayb marka horeba diintooda marna kuma jirin ee side bey u leeyihiin kusoo noqo?(88)."

Tolkiis waxay intaas ku darsadeen inay dadka magaaladooda soo mara ay waxay wataan ka dhici jireen iyo dharkoodaba, waana taas midduu ka hadlayo Ilaahay Tacaalaa, waana Aayadda lix iyo sideetan ee Suuratu Al Acraafi:

وَلَا تَقْعُدُوا بِكُلِّ صِرَاطٍ تُوعِدُونَ وَتَصُدُّونَ عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ مَنْ آمَنَ بِهِ وَتَبْغُونَهَا عِوَجًا وَاذْكُرُوا إِذْ كُنْتُمْ قَلِيلًا فَكَثَّرَكُمْ وَانْظُرُوا كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ الْمُفْسِدِينَ (86)

“Wa laa taqcuduu bikulli siraadhin tuuciduuna wa tasudduuna can sabiili Allaahi man aamana bihi wa tabghuunahaa ciwajan wa ath-kuruu ith kuntum qaliilan fa kath-tharakum wa anthuruu kayfa kaana caaqibatu al mufsidiina(86)**.”**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
“Hana fariisannina dariiq kasta, adinkoo dadka hadidaya oo cabsiinaya, diinta Ilaahayna ka leexinaya kuwa aaminay, adinkoo doonayaa inaad qalloocisaan: dariiqyada ayay fariisan jireen markaasay qofka doonayaa inuu islaamo oo Shucayb rumeeyo ayay waxay ku oran jireen: “Shucayb waa beenlow ee yuusan diintaada kaa saarin”, muslimiintana waxay ku hadidi jireen inay dilayaan oo ay ku cabsiin jireen. Waxaadna xusuusataan inaad tiro yareydeen oo uu markaas Ilaahay tiradiinna badiyay, waxaadna aragtaan ciribta iyo siday ku dambeeyeen kuwa mufsidiinta ahaa, ahna qawmu Luudh, oo ayan degmadooda tooda ka fogayn(86).”

Waxaa kaloo la yiri inay dadka canshuur ka qaadi jireenn ahaydna boqolkiiba toban, oo sidaasay ku ahaayeen kuwa ugu horreeyey oo adduunkaan canshuur qaada (oo canshuur waxay ka timid cushur oo macnihiisu yahay boqolkiisa toban oo cushur waxay ka timid casharah oo toban ah. Canshuurta la qaadayo intaas haba ka duwanaatee oo cushur ha ka yaraato ama ka badnaatee, oo canshuurta waagii hore waxaa afka carabiga lagu oran jiray Al Cushr/**العشر,** ninka qaadayana Al Caashir. Af carabiga cusubna waxaa canshuurta la yiraahdaa daraa’ib, waana daadka saadka ku xiga: xasanwali).
Halkaanna ku dhigi maynno wada hadallada dhex maray Shucayb iyo dadkiisa iyo siduu xujada ugu oogay iyo siday ayagu ugu jawaabeen, maxaa yeelay naska wada hadalkaasi wuxuu ku dhigan yahay Quraanka.”
Markaasay markay tolkiis beeniyeen Shucayb, ayuu u sheegay in la cathaabayo. Waxaa la yiri inuu Shucayb gabdho badan lahaa, waxaana kaloo la yiri inuu laba gabdhood lahaa, wiilna ma lahayn. Wuuna indha beelay, waana taas hadalka Ilaahay ee ku xusan Aayadda kow iyo sagaashan ee Suuratu Huud:

قَالُوا يَا شُعَيْبُ مَا نَفْقَهُ كَثِيرًا مِمَّا تَقُولُ وَإِنَّا لَنَرَاكَ فِينَا ضَعِيفًا وَلَوْلَا رَهْطُكَ لَرَجَمْنَاكَ وَمَا أَنْتَ عَلَيْنَا بِعَزِيزٍ (91)

“Qaaluu yaa Shucaybu maa nafqahu kathiiran mimmaa taquulu wa innaa la naraaka fiinaa daciifan wa law laa rah-dhuka la rajamnaaka wa maa anta calaynaa bi caziizin(91)**.”**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
“Waxay yiraahdeen: Shucaybow, ma garanaynno in badan oo ka mid ah waxaay leedahay, waxaanna u jeednaa inaad tag daran tahay – waxaa la yiri aragga indhihiisa

ayaa xumaa -, haddayan ahaan lahaynna inaad ka dhalataay qoys xoog badan oo naga kaa celiyay, waan ku dili lahayn oo dhagax ayaan kugu dili lahayn, adiguna agteenna kama ihid mid mid makaan sare leh(91).”

Taagdarradaanna wuxuu ula dan leeyahay arag li’idiisa iyo indho la’aantiisa. Waxaa kaloo la yiri inay taag darradaani tahay isagoo uusan Shucayb rag uu dhalay ayan jirin. Markaasay waxay ku yiraahdeen: “keen waxaad nagu cabsiinaysid oo cathaab ah.” Markaasuu Ilaahay wuxuu ku salliday kulayl ku socday toddoba maalmood ilaa uu ka bisleeyey jirkooda. Markaasuu markuu kulaylku ku batay ayay Madyan ka bexeen oo ay xoolohooda iyo haweenkooda iyo caruurtoodaba wateen ayna geeyeen inay kasoo waraabiyaan kayn ay lahaayeen oo geedo badnayd: kaas weeye hadalka Ilaahay Tacaalaa ee Aayadda sideed iyo toddobaatan ee Suuratu Al Xijri:

وَإِنْ كَانَ أَصْحَابُ الْأَيْكَةِ لَظَالِمِينَ (78)

“Wa in kaana asxaabu al aykati la thaalimiina(78)**.”**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
“Kuwa dega degmada Al Aykati waxay ahaayeen kuwo daallimiin kaafiriin ah(78).”

Oo ah “kuwa kaynta lahaa”.
Ibnu Cabbaas, Allaha labadoodaba raalli ka noqdee, wuxuu yiri: “Ilaahay wuxuu kusoo diray kulayl Jahannama laga keenay, markaasay ku kululaysay guryohooda, ayna biyohoodu ku karkareen ceelashooda iyo ilohoodaba ku jiray. Markaasay magaalada ka baxeen ayagoo cararaya. Markaasuu Ilaahay wuxuu ku salliday qorraxda oo kor ka bislaysay, wuxuuna ku salliday ciidda dhulka markaasay xagga cagohooda ka bislaysay. Sidaasay hilbaha jirkoodu ku daatay. Kaddib waxaa usoo dhalatay daruur madow, oo markay arkeen ay xaggeeda u dheereeyeen, ayagoo qabawgeeda naf ka raadinaya. Markaasay markay daruurtaas hoosteeda isugu wada yimaadeen ayay ayagoo idil wada dabooshay oo ay wada halaagtay. Waxaa kaloo la yiri inay daruurtaasu kusoo di’isay korkooda dab.

Kuwa sheegay inayan reer Madyan ahayn “asxaabu al aykah”, waxay yiraahdeen: “asxaabu al aykah sidaas ayaa kulaylkaas iyo daruurtaas loogu halaagay. Reer Madyanse waxaa lagu halaagay dhul gariir, oo Ilaahay Tacaalaa wuxuu yiri, waana Aayadda kow iyo sagaashan ee Suuratu Al Acraafi:

فَأَخَذَتْهُمُ الرَّجْفَةُ فَأَصْبَحُوا فِي دَارِهِمْ جَاثِمِينَ (91)

“Fa akhathathumu al rrajfatu fa asbaxuu fii daarihim jaathimiina(91)**.”**
Aayadda macneheedu waxaa weeeye:
“Markaasaa waxaa qabtay dhul gariir markaasay daarohooda dhexdooda ku wada dhinteen(91).”

Taasna waxay ku timid ayadoo uu Jibriil Calayhissalaamu u yimid oo uu hal qaylo ku qayliyay, qayladaasoo ay buuruhu la giriireen, dadkiina ay jilbojabsi u wada dheceen oo ay markaas dhammaantood wada dhinteen.
Waxaa la yiri inay Shucayb iyo inta rumaysay kaddib markii dadkooda la halaagay ay Makkah tageen, ayna halkaas ku noolaayeen ilaa ay "madaw lisabiilihim" oo ah ilaa ay meeshay doonayeen ka aadeen. Wa Allaahu Aclamu."

Nabi Muuse iyo Nabi Shucayb عليهما السلام

Al Khadhiibu Al Baghdaadii, ahna imaamka allifay "Taariikhu Baghdaad", wuxuu kitaabkiisa "Taariikhu Al Anbiyaa'i" bogga boqol shan iyo lixdan ku wariyay wada hadalka Muuse iyo ina Shucayb, oo markay u sheegtay inuusan raggaas xoolohooda waraabsanaya ayan ayaga u oggolayn inay ayaguna arigooda ceelkaas ka waraabiyaan wuxuu ku yiri: "maxayna tahay sababtay idiinku diidayaan?" Waxay tiri: "maxaa yeelay annagu waxaan ku taagannahay diin kale oo aan diintooda ahayn." Wuxuu labada gabdhood ku yiri: "labadiiduna yaad tihiin?" Waxay yiraahdeen: "annagu waxaan nahay labada gabdhood ee Shucayb, isaguna waa muslin, kuwaasna waa gaalo."

وَلَمَّا وَرَدَ مَاءَ مَدْيَنَ وَجَدَ عَلَيْهِ أُمَّةً مِنَ النَّاسِ يَسْقُونَ وَوَجَدَ مِنْ دُونِهِمُ امْرَأَتَيْنِ تَذُودَانِ قَالَ مَا خَطْبُكُمَا قَالَتَا لَا نَسْقِي حَتَّى يُصْدِرَ الرِّعَاءُ وَأَبُونَا شَيْخٌ كَبِيرٌ (23)

"Wa lammaa warada maa'a Madyana wajada calayhi ummatan mina al nnaasi yasquuna wa wajada min duunihim imra'atayni tathuudaani qaala maa khadhbukumaa? Qaalataa: laa nasqii xattaa yusdira al rricaa'u wa abuunaa shaykhun kabiirun!(23)**."**
Waana Aayadda saddex iyo labaatanaad ee Suuratu Al Qasasi macneheedu waxaa weye:
"Markuu yimid ceelka degmada Madyan, ayna xoolohooda ka waraabin jireen, wuxuu arkay koox rag ah oo xoolohooda ceelka ka waraabinaya, ayaga sokadoodana wuxuu arkay laba haweeney oo oo arigooda ceelka ka celiyay oo meel gooni ah ku haya, markaasuu Muuse wuxuu labadoodaas ku yiri: "arrinkiinnu muxuu yahay oo aad arigiinna u waraabin weydeen?" Wuxuu ku yiraahdeen: "arigeenna waraabin maynno jeer uu raggu kooda wada waraabsado oo ay ceelka ka tagaan, maxaa yeelay laba gabdhood ayaa nahay raggana ceelka kuma ciriirin karno oo kulama tartami karno, marka markay ayagoo gaddoomaan ayaan waxay xoolohoodu barkadda ku reebeen oo biyo ah arigeenna ka waraabineynnaa. Aabeheenna waa oday da' weyn oo aan awoodin inuu arigiisa waraabiyo(23)."

Markuu u sheegay inuu isagu dhagaxa ceelka afkiisa ka qaadayana waxay ku tiri: "adigu ma kartid qaadiddiisa." Markaasuu wuxuu yiri: "waan karaa inshaa'a Allaahu Tacaalaa iyo idankiisa." Kaddibna wuxuu yiri:

بسم الله العظيم الواحد المعبود إله إبراهيم وإسحاق ويعقوب! أللهم أعني!

"Bismi Allaahi Al Cathiimi Al Waaxidi Al Macbuudi Ilaaha Ibraahiima wa Isxaaqa wa Yacquuba! Allaahumma acinnii (i caawin)." Markaasu dhagaxa qaaday uuna dhinac u dhigay oo ceelka afkiisa ka wareejiyay. Kaddibna wuxuu qaatay dalwiga uuna ceelka

biyaha kasoo saaray isagoo leh: “al xamdu li Allaahi Al Maxmuudi Al Macbuudi! Allaahumma ansur cabdaka al madhruudi (Ilaahayow u gargaar addoonkaaga la soo eryay, waana isaga laftiisa).” Sidaasuu ceelka biyaha uga soo saarayay ilaa uu ariga labada gabdhood ka wabxo, kaddibna wuxuu u wareegay oo fariistay geed hoostiis iyo harkiisa, ayadoo ay labada gabdhoodna la yaaban yihiin xooggiisa iyo siduu labadooda ugu naxariistayba iyo badnida siduu Ilaahay u xusayo…Markaasuu Shucayb wuxuu labadooda midda yar ku yiri (waana kaddib markay gurigooda kusoo laabteen oo ay aabohood Shucayb oo indha la’aa u wariyeen sida arigooda loogu waraabiyay): “degdeg oo ninka ii keen, isagoo gaajoon, si aan uga abaal marinno wanaagga uu noo falay:

فَجَاءَتْهُ إِحْدَاهُمَا تَمْشِي عَلَى اسْتِحْيَاءٍ قَالَتْ إِنَّ أَبِي يَدْعُوكَ لِيَجْزِيَكَ أَجْرَ مَا سَقَيْتَ لَنَا فَلَمَّا جَاءَهُ وَقَصَّ عَلَيْهِ الْقَصَصَ قَالَ لَا تَخَفْ نَجَوْتَ مِنَ الْقَوْمِ الظَّالِمِينَ (25)

“Fa jaa’athu ixdaahumaa tamshii calaa istixyaa’in qaalat inna abii yadcuuka liyajziyaka ajra maa saqayta lanaa falammaa jaa’ahu wa qassa calayhi al qasasa qaala: “laa takhaf najawta mina al qawmi al th-thaalimiina(25)**.”**

Waana Aayadda shan iyo labaatanaad ee Suuratu Al Qasasi oo macneheedu yahay:

“Markaasay middood - waana labada gabdhood – Muuse u timid, ayadoo si xishood ku dheehan yahay u socota, waxayna ku titi: “waxaa kuu yeeraya aabahay si uu kaaga abaal gudo sidaad arigeenna noogu waraabisay”, markaasuu soo raacay oo markuu Shucayb u yimid wuxuu uga sheekeeye warkiisa. Markaasuu Shucayb wuxuu Muuse ku yiri: “ha baqin oo waad ka badbaaday qawmka daallimiinta ah(25).”

Markaasuu markuu Muuse u yimid ayuu Shucayb wuxuu ku yiri: “ila joog oo ila deg waxaad iga caawinaysaa umuurahaygee!” Shucayb wuxuu Muuse siiyay ul uu ariga u raaco. Waa intaas warkiisu.

Sidaasuu Muuse Madyan ku degay. Toban sano markuu ariga u raacay kaddib ayuu Shucayb wuxuu Muuse u guuriyay gabdhiisa yar oo magaceedu ahaa Saafuuraa’. Walaasheedna waxay ahayd Layyaa. Saafuuraa’ waxay Muuse u dhashay wiilasha kala ah Jurshuun iyo Ilyaacaazir.

Muuse markuu tobankaas sano dhammaystay oo gabdhana loo guuriyay ayuu Shucayb ka idan qaatay inuu dalkiisa Masar ku noqdo xaaskiisana wato. Markuu marayo Sinaay ayaa Muuse Nabi iyo Rasuul laga dhigay, kaddibna uu Masar ku laabtay.

Al Bakriyyu Al Andalsiyyu/البكري الأندلوسي

الوزير الفقيه أبو عبيدة، عبد الله بن عبد العزيز البكري الأندلوسي Al Waziiru Al Faqiih Abuu Cubayd, Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Caziiz Al Bakriyyi Al Andalsiyyi, lana oofsaday sanadka afar boqol toddoba iyo sideetan Hijriga wuxuu kitaabkiisa “Mujamu Maa Istacjama Min Asmaa’i Al Bilaadi wa Al Mawaadici” laguna daabacay Caalamu Al Kutubi ee Bayruut, erayga “Madyan” ka yiri:

Madyan waa beled ku yaalla Shaam, dhinaca Ghazzah, waana midka ku xusan Kitaabka Ilaahay Tacaalaa:

وَإِلَى مَدْيَنَ أَخَاهُمْ شُعَيْبًا فَقَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللَّهَ وَارْجُوا الْيَوْمَ الْآخِرَ وَلَا تَعْثَوْا فِي الْأَرْضِ مُفْسِدِينَ (36)

"Wa ilaa Madyana akhaahum Shucayban faqaala yaa qawmi acbuduu Allaaha warjuu al yawma al aakhira wa la tacthaw fii al ardi mufsidiina(36)**."**
Waana Aayadda lix iyo soddonaad ee Suuratu Al Cankabuut oo macneheedu yahay:
"Madyanna waxaan u dirnay walaalkood Shucayb, markaasuu wuxuu ku yiri: "tolkeeyow, Ilaahay caabuda, maalinta aakhirana ka baqa, arliga dhexdiisana fasaad ha ku suubinina(36)."

Wuxuu kaloo yiri: "Madyan waa dhulay degaan qabiilka Juthaam, waxa saxda ah oo nasabkiisa ku saabsanna waa inuu u dhashay Juthaam bin Cadiyyi bin Al Xaarith ibnu Murrah bin Udad bin Zayd bin Cumar bin Cariib bin Zayd bin Kahlaan.
Shucayb-na Nabiga Calayhissalaamu ahna midka loo diray reer Madyan wuxuu u dhashay **بني وائل بن جذم** Banii Waa'il bin Juthaam. Nabiguna (Muxammad) Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu wafdiga Juthaam ku yiri:

مرحبا بقوم شعيب، وأصهار موسي، ولاتقوم الساعة حتى يتزوج فيكم المسيح، ويولد له

"Marxaban bi qawmi Shucayb, wa ashaari Muusaa, wa laa taquumu Al Ssaacatu xattaa yatazawwaja fiikum Al Masiixu, wa yuuladu lahu."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Meel waasac ah kusoo dhowaada tolka Shucaybow, iyo xididka Muuse. Saacadduna dhici mayso jeer uu Al Masiixu (ciise) idinka guursado, caruurna loo dhalo."

Ibnu Isxaaq/أبن إسحاق

Ibnu Isxaaqna wuxuu yiri: "waa Shucayb bin Miikaa'iil/**شعيب بن ميكائيل** oo ah dhasha Madyan.

Madyan bin Ibraahiim Al Khaliil Calayhissalaamu/مدين بن إبراهيم الخليل عليه السلام

Madyan wuxuu ahaa ina Nabi Ibraahiim oo ahaa kan ugu horreeyey oo bartaas dega. Dadka Madyan dega waxay khayaani jireen miisanka iyo beega badeecadaha, waxayna ahaayeen burcad dadka dariiqa ka gooya, waxayna caabudi jireen asnaam, oo gaalay ahaayeen.

Al Cumarii/العمري

إبن فضل الله أحمد بن يحيى بن فضل الله العمري Ibnu Fadlu Allaahi Axmad bin Yaxyaa bin Fadlu Allaahi Al Cumarii, oo dhashay sanadka toddoba boqol ee Hijriga lana oofsaday sanadka Hijriga ah ee toddoba boqol iyo sagaal iyo afartanka, una dhiganta kun saddex boqol iyo kow ilaa kun saddex boqol sagaalk iyo afartan miilaadiga ah, wuxuu kitaabkiisa **مسالك الأبصار في ممالك الأمصار**Masaaliki Al Absaari fii Mamaaliki Al Amsaari, uuna hubiyay, faallana ku daray Al Doktoor **مصطفى أبو ضيف أحمد** Musdhafaa Abuu Dayf Axmad, ku yiri:

“qabriga Shucayb wuxuu ku yaallaa tuulada Xidh-dhiin (ee arliga Falasdhiin), qabriga haweentiisuna burta korkeeduu ku yaallaa sida la yiri.”

Maxaa Muuse Madyan keenay?

Nabi Muuse wuxuu si aan ula kac ahayn ayuu nin reer masar ah u dilay, oo uu feer ku dhuftay isagoo nin reer Banii Israa’iil ah oo uu taagdarraystay ka dhicinaya. Markaasuu ninku dhintay. Markaasuu Fircoonka Masar wuxuu xukumay in Muuse ninkaas uu dilay loo qasaaso, oo sharcigooda ayaa sidaas dhigayay. Markaasaa waxaa Muuse u yimid nin muslin ah wuxuuna u sheegay xukunkaas lagu riday wuxuuna kula taliyay inuu Masar ba baxo. Ninkaas, siduu Al Ssaxxaar u yiri, magaciisu wuxuu ahaa Sinxuut, wuxuuna ahaa walaalka la dhashay haweenta Fircoon ee Aasiya bintu Muzaaxim. Labadooduna waxay ahaayeen ilma adeerrada Fircoon oo labadooda aabe ayaa wada dhashay. Sinxuut wuxuu ahaa muslin ku taagan diinta iyo shareecada Nabi Yuusuf, waana ninka Suuratu Al Mu’min lagu magacaabay, ahna ninka islaannimadiisa qarinayay. Suuratu Al Mu’min waa isla Suuratu Ghaafir.

Wuxuu Ilaahay Tacaalaa Aayadda labaatanaad ee Suuratu Al Qasas ku yiri:

وَجَاءَ رَجُلٌ مِنْ أَقْصَى الْمَدِينَةِ يَسْعَى قَالَ يَا مُوسَى إِنَّ الْمَلَأَ يَأْتَمِرُونَ بِكَ لِيَقْتُلُوكَ فَاخْرُجْ إِنِّي لَكَ مِنَ النَّاصِحِينَ (20)

“Wa jaa’a rajulun min aqsaa al madiinati yascaa qaala: “yaa Muusaa inna al mala’a ya’tamiruuna bika liyaqtuluuka, fa akhruj innii laka mina al nnaasixiina(20)**.”**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
“Waxaana magaalada meesheeda ugu fog ka yimid nin socod dheereynaya, wuxuuna yiri: “Muusow, madaxda dawladda fircoon adigay kuu tashanayaan waxay ku tashanayaan inay ku dilaan, marka anigu waxaan ka mid ahay kuwa kula talinaya ee magaalada ka bax.(20).”

Markaasuu taladiisa yeelay oo uu Masar ka baxay, uuna xagga Madyan aaday, isagoo aan wali Nabi ahayn, aqoonna u lahayn dhanka Madyan ka xigto. Markaasuu wuxuu yiri:

فَخَرَجَ مِنْهَا خَائِفًا يَتَرَقَّبُ قَالَ رَبِّ نَجِّنِي مِنَ الْقَوْمِ الظَّالِمِينَ (21)

“Fa kharaja minhaa khaa’ifan yataraqqabu qaala Rabbi najjinii mina al qawma al th-thaalimiina(21)**.”**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
“Markaasuu ka baxay isagoo baqayaa hareerihiisana ilaalinaya, wuxuuna yiri: “Rabbiyow iga badbaadi qawmka daallimiinta ah”(21).”

Waana duco ku habboon inuu ku ducaysto qof kastoo muslin ah oo baqaya, lana dulmiyay.
Wuuna Cazza wa Jalla ku darya oo yiri:

وَلَمَّا تَوَجَّهَ تِلْقَاءَ مَدْيَنَ قَالَ عَسَى رَبِّي أَنْ يَهْدِيَنِي سَوَاءَ السَّبِيلِ (22)

“Wa lammaa tawajjaha tilqaa’a Madyana qaala casaa Rabbii an yahdiyanii sawaa’a al ssabiili(22)**.”**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
“Markuu u jeestay xagga Madyan wuxuu yiri: “waxaa dhici karta inuu Rabbigay dariiqa toosan igu hanuuniyo, oo Muuse waa lugeynayay, saadna ma wadan, waana caga caddaa, Madyanna hore uma tegin oo sida lagu tago ma aqoon, waxayna Masar u jirtay safar sideed maalmood ah(22).”

Markaasuu Ilaahay Tacaalaa ducadiisa aqbalay kuna hanuuniyay oo uu Madyan keenay.

Intuu Muuse Madyan joogay

Nabi Muuse Calayhissalaamu wuxuu Madyan joogay oo uu Nabi Shucayb Calayhissalaamu ariga u raacayay ceelkaanna uga waraabinayay toban sano oo kaamil ah Tobankaas sano oo shaqada ah waxay ahayd meherka Safuuraa’ gabadha Nabi Shucayb Waxayna u dhashay wiilasha kala ah Jurshuun iyo Ilyaacaazir.

Kasoo gaddoonka Madyan

Markaan ceelka kasoo gaddoonnay ayaan waxaan dhex marnay tuulada Bidc anigoo raadinaya maktabad aan ka gato wax kitaab ah oo Bidc iyo Madyan ku saabsan, waanse ka waayay, oo laba maktabadood ayaan helnay, midkoodna kitaabkaan doonayay ma hayn. Kaddib waxaan u gaddoonnay xagga Tabuuk.
Salaadda maghrib waxay noogu gashay annagoo Madyan kasoo gaddoonnay oo tuulo xeebta Badda Cas ku taalla maraynna. Markaan tuuladaas dhaafnay ayaan waxaan istaagnay meel saxro ah oo buuro dhexdooda ah, uuna ku yaallo mawlac dariiqa dhiniciisa ku yaalla oo ka sameysan xabbado blokeeti ah oo la is daba dhigay oo qol muuqaalkiis loo yeelay iyo mixraab: dhulkiisu waa ciiddii saxrada oo aan ku sujuudnay. Mawlacaas agtiisana waxaa yaalla haan wayn oo ay ku kor dhigan tahay “al waduu’” oo ah ‘wayso”. Halkaas ayaan maghrib iyo cishe lasoo hor mariyay ku tukannay! Mawlacaas aad ayuu ii cajabiyay: wuxuu ka koobnaa ilaa 20-30 blokeeti oo la is daba geliyay oo dariiqa looga jeedo oo qol muuqaalkiisa leh. Waxaan ugu nimid nin ku tukanaya oo markaan soo galnay salaaddiisa dhammaystay oo baxay.
Isla habeenkaas oo habeen sabti ah ayaanna Tabuuk kusoo laabtay oo ku hoyday. Ninka baabuurka lahaa ayaa diiday markaan Tabuuk kusoo soconnay waxaan ahayn inaan gurigiisa habeenkaas ku hoydo mooyee in kastoo aan wax badan ka diiday oo aan hotel i gee iri. Taleefan ayuu ciddiisa usii diray inay casho noo diyaariyaan. Markaan nimid ayaan cashaynnay, wuxuuna i dejiyay qol wayn oo musqushiisa leh, kana wada go’an dhankuu isagu deggan yahay. Markaan cashaynnay kaddib ayaan seexday.
Subixii dambe markaan salaadda fajar tukannay ayaan hadana seexannay. Markay qiyaas laba saac ahayd ayaan quraacannay, kaddibna aan Al Culaa iyo Madaa’inu Saalex u

ambabaxnay. Waxaan ku quraacannay hilib ari oo uu yiri waa orgi kalaankal ah oo maraq leh iyo muufo guriga lagu dubay iyo shaah.

Tabuuk iyo Madyan waxay ka mid yihiin arliga barakaysan

Tabuuk iyo Madyan waxay ka mid yihiin arliga barakaysan oo uu Ilaahay Tacaalaa ku sheegay Aayadda koowaad ee Suuratu Al Israa'i:

سُبْحَانَ الَّذِي أَسْرَى بِعَبْدِهِ لَيْلًا مِنَ الْمَسْجِدِ الْحَرَامِ إِلَى الْمَسْجِدِ الْأَقْصَى الَّذِي بَارَكْنَا حَوْلَهُ لِنُرِيَهُ مِنْ آيَاتِنَا إِنَّهُ هُوَ السَّمِيعُ الْبَصِيرُ(1)

"Subxaanaha Allathii asraa bi cabdiHi laylan mina al Masjid Al Xaraami ilaa Al Masjidi Al Aqsaa allathii baaraknaa xawlahu li nuriyahu min Aayaatinaa Innahu Huwa Al Ssamiicu Al Basiiru(1)**."**
Waana Aayadda koowaad ee Suuratu Al Israa'i oo macneheedu yahay:
"Waxaa ceeb iyo naaqusnimo iyo baahi ka hufan Midka dheelmiyay addoonkiisa habeennimo, kana dheelmiyay Al Masjidu Al Xaraamu ee Makkah Al Mukarramah una dheelmiyay Al Masjidu Al Aqsaa ee Qudus midkaan hareerihiisa barakaynnay, si aan u tusinno kuwa ka mid ah Aayaatkeenna, Isaguna waa Midka wax walba maqla wax walbana u jeeda(1)."
Arliga Shaam la yiraahdo oo maanta ka kooban Siiriya, Falasdhiin, Urdun iyo Lubnaan ayaa la isku yiraahdaa arliga barakaysan.

Duullaanka Zayd bin Xaarithah ee Madyan

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Zayd bin Xaarithah u diray degmada **مدين Madyan** (oo boqol laba bqol iyo lixdan kiiloomitir Tabuuk dhanka xeebta badda ka xigta. Maantana waxaa la yiraahdaa Al Bidc. Tabuukna waxay Al Madiinah waqooyiga ka xigtaa qiyaas sideed boqol oo kiiloomitir), ayadoo uu la socdo **ضميرة** Dumayrah, mawlaha **علي بن أبي طالب** Caliyyu bin Abii Dhaalib, Allaaha raalli ka noqdee, iyo nin walaalkiis ah. Markaasuu **ميناء Miinaa'a** (oo ku taalla xeebta badda **خليج العقبة** Khaliiju Al Caqabah. Hadda waxaa xagga badda Bidc uga beegan tuulo la yiraahdo Maqnaa oo xeebta Gacanta Al Caqabah saaran) dad kasoo qafaalay, waana xeebta badda waxayna ahaayeen dad isku dhex jira. Markaasaa dadkaas suuqa lagu gatay, oo sidaas ay dad kala duwani kala gateen dad isku qoys ahaa. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo baxay oo uu arkay ayagoo booyaya, uuna yiri:

مالكم؟

"maa lakum?" oo macnihiisu yahay: "maxaad leedihiin?" Waxaa la yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qoyska ayaa la kala geeyey." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Alaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

لاتبيعوهم إلا جميعا

"laa tabiicuuhum illaa jamiican", oo macnihiisu yahay: "ha iibinnina ayagoo wada jira mooyee." (oo uu ibnu Hishaam yiri: "uuna ka waday Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam hooyada iyo caruurteeda.").

Madyan. Xasanwali 1432H/2011M.

Ceelka Madyan. Xasanwali 1432H/2011M.

Ceelka Madyan Xasanwali 1432H/2011M.

Ceelka Madyan. Xasanwali 1432H/2011M.

Guryaha reer Shucayb ee Madyan. Xasanwali 1432H/2011M.

Guryaha buuraha laga qotay ee Madyan. Xasanwali 1432H/2011M.

Albaabka guri buurta laga qoday: reer Shucayb jir ahaan annagoo kale ayay ahaayeen. Xasanwali 1432H/2011M.

Guryahay reer Madyan buuraha ka qoteen. Xasanwali 1432H/2011M.

Buuraalayda ku hareereysan Madyan oo xilliga qaboobaha baraf saaran yahay. Xasanwali 1432H/2011M.

Sidaasuu kitaabkaani noogu dhammaaday waxaanna ku gunaanadeynnaa annagoo leh:

الحمد لله رب العالمين وصلى الله على سيدنا ومولانا محمد وعلى آله الطاهرين الطيبين وسلم تسليما كثيراكلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون.

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM
Makkah Al Mukarramah
Caashuuraa' tobanka bisha Muxarram ee sanadka kun afar boqol saddex iyo soddon Hijriga, una dhiganta lixda bisha Disembar laba kun kow iyo toban Miilaadiga.

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan wuxuu ku dashay Gaalkacyo degmadaasoo uu aabihiis qaalli ka ahaa, dayrtii la magac baxday Hoobaaq. Hoobaaq waa beel daaqsiin ah oo ka mid ah dooxada Golol, halkaasoo ay eedi ku kala gaartay labada qabiil ee Cumar Maxamuud iyo Sacad dayrtaas, eedaasoo bilaabatay 1943 socotayna ilaa 1944. Xasanweli wuxuu u dhashay Shiikhaal Looboge, oo ah Quraysh, ayagoo ah ubadka Abuu Bakar Al Ssddiiqu, Saaxiibka iyo ina adeerka iyo soddogga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Looboge aabihiis Fiqi Cumar wuxuu ku noolaa Boqortooyada Harar siday u warisay tirada lix boqol iyo sagaal iyo afartan ee wargeyska dalka Sucuudiga kasoo baxa ee la yiraahdo Al Muslimuuna, soona baxay maalinta Jimce ee toddobada bisha Rabiicu al Awwal ee sanadka Hijriga ah ee kun iyo afar boqol iyo sideed iyo toban, una dhigantah kow iyo tobanka bisha Luulyo ee sanadka kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo sagaashanka, boggiisa tobanaad. Yuusuf Cabdu Al Raxmaan Shiikh oo maqaaladaas qoray wuxuu ku yiri: "Kaddib markay saliibiyiinta krishtaanka ahi ay gacanta ku dhigeen Bayti Al Maqdis, dhammaadka qarniga shan iyo tobnaad ee Miilaadiga ah iyo dhammaadka kan shanaad ee Hijriga, ayna ku sugnaadeen Shaam, ayna gacanta ku dhigeen Khaliiju Al Caqabah ee ku dara Badda Cas, ayay krishtaanku waxay raadiyeen cid ay is gaashaanbuursadaan, oo Badda Cas xagga koofureed uga goysa. Markaasey waxay heleen xabshada krishtaanka ah oo ay markaas gaashaanbuur la noqdeen, ayna kula heshiiyeen inay iska kaashadaan la dagaallanka islaamka iyo muslimiintaba, kuna gaaray taas inay xabashadu kusoo duusho oo ay qabsato Boqortooyada Islaamka ee Harar, taasoo gogol dhig u noqoneysa ku duulidda Xijaaz iyo duminta Kacbada la Sharfay. Sidaas ayayna ku heshiiyeen. Markaasey xabashadu waxay kusoo duushay Harar, waxaana usoo baxay oo ka hortegey Al Shiikh Abaadir oo soomaalidu u taqaanno Fiqi Cumar, ahna aabaha dhalay Aw Qudhub. Markaasuu Amiir Cumar bin Shamsu Al Ddiin (oo ah Fiqi Cumar) si xun u jebiyay oo ka adkaaday. Markaasey xabshadu waxay ka gargaar iyo gurmad dalbeen gaashaanbuurtooda krishtaanka ah. Qaylo dhaankoodaas waxaa kasoo jawaabay Richard the Lion-heart oo ahaa boqorka ingiriiska, ahaana maareeyaha hawlaha ka socday bariga dhexe "Bariga Carabta". Richard wuxuu soo diray ciidammadiisa ka kooban burtuqiis iyo talyaani, si ay xabashada ugu gargaaraan. Ciidammadaani waxay gacanta ku dhigeen oo qabsadeen dekadaha ay Harar lahayd oo ah Zaylac iyo Barbara iyo Bulaxaar, kuwaanoo hadda ku yaalla gobolka waqooyi ee Jamhuuriyada Soomaaliya. Ciidammadaasu waxay soo gaareen ilaa dusha magaalada Harar. Markaasey Imaarada Makkah Al Mukarramah iyo Yaman ayay waxay Harar usoo direen ciidammo gurmad ah. Sidaas ayay ciidammada Islaamku uga adkaadeen kuwa krishtaanka ah, uusanna krishtaamiinta Shaam uga laaban hal askariba ha ahaadee, ayadoo dhammaantood lagu laayey inta u dhexeysa Harar iyo Muqdisho iyo Barbara. Muqdisho waxay Harar usoo dirtay gurmad ahaan fardo iyo hub." Xasanweli wuxuu 1970 ka qalin jebiyay Jaamacadda Bologna ee dalka Talyaaniga halkaasoo uu ku bartay takhtarnimada xoolaha. Kaddib wuxuu noqday macallin Dugsiga Sare ee Xasan Barsane ee Muqdisho, Macallin Kulliyada Daawada Xoolaha ee Jaamacadda Qaranka Soomaaliyeed, Xildhibaan Golaha Shacbiga Qaranka ee Soomaaliya, Danjiraha Soomaaliya ee Dawlado Yurub ah, kaddibna wuxuu ku wareegay Jaamacadda Dawladaha Carabta, uuna noqday Danjireheeda Kenya, iyo Danjireheeda Qarammada Midoobay ee Vienna. Kaddib wuxuu soo degay USA, wuxuuna noqday Macallin Dugsiga Sare ee English High School ee Boston, Baare Shareecada Islaamka ee Islamic Legal Studies Program ee Harvard Law School ee Harvard University ee

Cambridge. Siirada Ibnu Hishaam ayuu soomaali ku tarjumay 180 cajaloodna ku duubay. Kaddib wuxuu ilaa sideed sano ka ahaa imaam masjidyada xabsiyada ku yaalla gobolka Massachusetts oo ay Boston caasimadda u tahay ee dalka maraykanka, halkaasoo uu dadka xabbisan ku salaadana tujin jiray, barina jiray diinta islaamka, hortiisana ay ku islaameen khalqi badan oo rag iyo dumarba leh, uuna shahaadada xaqqa ah u mariyay, mahaddana Ilaahay ayaa iska leh